

Amarka L. 7

Xeer ku-meelgaara ee midaynaya iyo cusboonaysiinaya xeer horay Dalka uga u jiray arrimaha garsoorka.

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULHA

Marku arkay Xeerka 8 Feberaayo 1950 lamba. 12;

Marka uu arkay dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee taakiikhda 31 Maarsو 1950;

Marka uu Garowsaday baahida loo qabo in si deg-degga loo soo saaro xeer ku-meelgaara ee midaynaya iyo cusboonaysiinaya kuwii horay Dalka uga u jiray arrimaha garsoorka;

Isagoo Qaddarinayo awoodda la siiyay;

WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Dhammaan xeerarkii nidaamka garsoorka lagu meelmariyay r. d, 20 Juun 1935, lr. 1638, oraahda “maaddooyinka gumaysiga ama waxa la mida” waa in lagu baddalaa kuwa” soomaalida iyo shisheeyaha sharcyan la barbar-dhigo karo”.

Qod. 2

Inta Dalka soo saarayo xeerka nidaamka garsoorka cusub iyadoo la dabbaqayo Heshiiska Wasaayadda Golaha Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya ay ku oggolaaden Ginevra, 27 Jannaayo 1950, dhammaan arrimaha garsoorka la soo wareejay, eek u saabsan arrimaha garsoorka, ee xeerka nidaamka garsoorka lagu oggolaaday r. d. 20 Juun 1935, lr. 1638, iyo xeerarka kale iyo nidaamyada Dalka ka jira, ee ku wajahan: “Governatooraha” waxaa qabanaya Maamulka.

Qod. 3.

Ilaa inta si ka duwan wax loo nidaaminayo, go’aanada garsoorka iyo arrimaha kale, ee lagu saleeyay xeerarkii Dalka ka jiray, waa in lagu qabeeyaa magaca Madaxweynaha Dalka, iyo iyago la siinayo “Magaca Sharciga”. Waxaa loo aqoonsanaya kuwa saxa go’aanadii iyo qoraalladi loo isticmallay qaabkii la soo sheegay oo ka soo bilowday 1 Abril 1950 illaa taariikhda dhaqangalka amarkaan.

Qod. 4

Dhaqangalka qodobada 3 iyo 4 ee xeerka nidaamka garsoorka lagu oggolaaday r. d. 20 Juun 1938, xadka qiimaha iqtisaaska dhexdhexaadinta arrimaha madaniga iyo ganacsiga u degsan waa 10.000 liire, iyo iqtisaaska garsooraha degmada oo ah 100.000 Liire. Racfaanka go’aanada ka sarreeya 2.000 liire racfan ayaa laga qaadan karaa.

Qod. 5

Kadka ugu yar iyo kan ugu badan ee ciqaabta ganaaxa ee uu sheegayo xeerka ciqaabta waa la siyaadiyay, iyadoo mid waliba laga dhigay 400 liire iyo 400.000 liire, halka ganaaxa fudud (amenda) uu mid kasta yahay 160 liire oyo 80.000 liire. Marka la eego xaaladda dhaqaale

ee dambiiлаha, haddii ганааха loo arko mid aan waxba ka tareyn, garsooruhу wuxuu iqtiyaar u leeyahay in uu siyaadiyo illaa saddex jibaар.

Qod. 6

Ciqaabaha lacageed ee liiraha talyaniga lagu sheegay, ee u degsan dambiyо qura, ee xeerka ciqaabta ama xeerar gaara iyo sidoo kale ciqaabo kale ee lacageed oo lagu sheegay liiraha talyaaniga ee ku saabsan xadgudub qura ee xeerka habka ciqaabta, waa la sideed jibaarayaа. Si la mida waa la siddeed jibaaraya xadka ciqaabta lacageed ee loo gooyay racfaanka xukunka iyo kuwa hay'adaha garsoorka Dalka ay u jideeyeen iqtisaaska qiimaha arrimaha ciqaabta.

Qod. 7

Marka, sikasta uu sharcigu qabo, la isku beegayo ciqaabta lacageed iyo ciqaabta xarigga, xisaabinta waxay noqonaysa 400 liire, ama jajabka 400 liire halkii maalin oo xariga ah.

Qod. 8

Marka si cad loo goynayo ciqaabta lacageed, xiriirkа ka dhexeeyaa liiraha iyo shilinka Afrikada Bari waxaa lagu jaangoynayaа boqolkii liire hal shilin.

Qod. 9

Dambiyada ay galaan soomaalida iyo shisheeyaha oo garsoor ahaan la babar-dhigi karo, hay'adaha garsoorka, marka ay dabbaqayan xeerka ciqaabta iyo xeer kasta ama nidaam kasta, waxay ku ridi karaan ciqaab ka hoosaysa midka ugu yare ee u degsan, iyo mararka ciqaabta xarigga iyo ciqaabta lacageed la isugu darayo, wuxuu dabbaqi kara keliya ciqaabta xarigga ama midda lacageed.

Qod. 10

Dacwadaha socday laga soo bilaabo 31 Maарso 1950 waxaa ku sugnaanayaan xaaladda hadda ay joogaan, waxaana qaадaya Hay'adda iqtisaaska u leh sida uu qabo xeerka nidaamka garsoorka lagu meelmariyay r. d. 20 Juun 1938.

Qod. 11

Qod. 17, lamba. I, ee xeerka nidaamka garsoorka lagu meelmariyay R. D. ee 20 Juun 1935 lamba. 38 waa la baabi'iyay.

Marka la baabi'yo xeerarka ay soo saareen Masuulinta Biritanka ee arrimaha garsoorka waxaa soo baxay Amarka lr. 5 ee taariikhda 12 April qod. 4.

Qod. 12

Amarkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyо Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 12 Abril 1950.

Maamulaha

Fornari